

Haddii ilmahaagu uu u baahan yahay daawo marka uu ku jiro xanaanada caruurta, dugsiga ama SFO.

Marmarka qaarkood waa in carruurta hesho daawooyin muhiim u ah kolka ay ku sugan yihiin xanaanada caruurta ama dugsiga.

Had iyo jeer waa masuuliyada waalidiinta / mas'uulka ka ah in ilmuhu helo daawooyinka si sax ah iyo wakhtiga saxda ah ee waafiqsan waxa uu dhakhtarka go'aamiyay.

Waalidiinta ama cidii ilmaha mas'uul ka ahi waa inay la xidhiidhaan maamulka xanaanada ama dugsiga / SFO una sheegaan macluumaadka ku saabsan baahida uu ilmuhu u qabo daawada iyo qaabkii looga caawin lahaa.

Maamulka ayaa kolkaa qiimaynaya in shaqaalaha xanaanada caruurta ama dugsiga ay leeyihiin aqoon ay ku fulin karaan daawo siinta.

Waa inaad saxeexdaa heshiis aad ku wareejinaysaan hawsha daawo siinta xiliga ay furan yihiin xanaanada ama dugsiga / SFO.

Shaqaalaha loo xil saaray hawshaan waa inay helaan tababarka iyo macluumaadka muhiimka u ah daawo siinta ayna ka helaan waalidiinta / mas'uulka, kalkaaliyayaasha caafimaadka ama dhakhtar.

Marka heshiiska la saxiixayo waa inaad tixraacdaa kaadhka dawada iyo tilmaamaha daaweynta degdega ah ee uu saxiixay dhakhtarka aad la joogteen.

